

## Ma ogtahay in xarafka (JA?) uu kulmiyo sharqamaha guud?



**Ma ogtahay in xarafka (JA') uu kulmiyo sharqamaha guud?** JUUQ: sharqanta dadkaJAAQ: sharqanta xoolahaJIBAAD: sharqanta dugaaggaJALAW: sharqanta shimbirahaJAQAQAF: sharqanta xamaaratadaJALALAF: sharqanta geedaha lulanaya JIIQJIIQ: sharqanta alaab gaadid saaranJARARAC: sharqanta walxo la jeexayoJALALAQ: sharqanta biyahaJINIQ: sharqanta biro isku dhacayaJIRIRIQ: sharqanta walxo la isku xirayoJUG: sharqanta walxo la tumayo ama qaraxJURURUC: sharqanta walxo dab lagu dubayoJIRIRIG: sharqanta onkodka kaa fod. Mase ogtahay codka xawayaanka aan caqliga lahayn in la isku yiraahdo (afjaaq) mase ogtahay (afjaaqaas) in dadku u adeegsado. Baaq sida laba qofood oo iskugu baaqaya cod aan eray la fahmi karo ahayn balse qofku dareemayo in lala hadlayo. ?Juuq waa cod Aadane jaaqna waa, jabaqda xolaade Jibaad waa cod bahal jalawna waa, jihasho baalleeye Jaqafjaqafna waa jiitan halaq, jaqaftankiisiye Jalalafina waa geed dabayl, ay jafaalidaye Jiiqjiiqna waa agab la raray, jeer is xogiddiise Jiririqina waa xarig la xiri, jugina waa qaraxyo Jararacinna waa maro dillaac, amase jeexjeexe Jururucana waa jaan la gubi, giririg waa roobka Jalalaqina waa biya socdoo, jeexo ku ordaaya.? **Diyaarintii iyo curintii: abwaaan Maxamad Xuseen Faarax**